

# Greater Metropolitan Hotel Employers-Employees Health and Welfare Fund

Administered by Wilson-McShane Corporation

3001 Metro Drive – Suite 500  
Bloomington, MN 55425

Phone: (952) 854-0795  
Fax: (952) 854-1632  
Toll Free: (800) 535-6373

## FOOMKA DIIWAANGELINTA DABOOLISTA CAYMISKA CANUGGA(CARRUURTA) KUGU TIIRSAN

Shaqaalaha uqalma waxay ku dari karaan Canugga(Carruurta) Kugu Tiirsan si loogu daboolo Qorshaha Caafimaadka iyo Badqabka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta. Canug Ku Tiirsane Ah: Waxaa loola jeedaa carruurta ku tiirsan qofka shaqaalaha ah laga bilaabo dhalashada ilaa dhammaadka bisha ay gaaraan da'da 26. Canug Kugu Tiirsan waxa ku jira wiilka, gabadha, wiilka mid kamid ah labada waalid uu qofkale u dhalay, gabadha mid kamid ah labada waalid uu qofkale u dhalay ama canug korsasho oo uqalma.

Qiimaha caymiska ee \$ 613.05 (dhaqangalay 2/1/2024-01/31/2025 midkasta Canugga(Carruurta) Kugu Tiirsan waxay noqon doontaa mas'uuliyadda qofka shaqaalaha ah ee uqalma, iyo ugu dambeyn bisha kowdeeda ee caymiska bishaas.

Si loogu daro Canugga(Carruurta) Kugu Tiirsan si loogu daboolo caymiska hoos yimaada Qorshaha, waa in aad buuxisaa Foomka Diiwaangelinta ee soo socda, aad bixisaa dukumiintiyada ku-tiirsanaha ee loo baahan yahay, oo aad xogtan iyada oo ay la socoto khidmada(ha) bishiiba ku celisaa Xafiiska Sanduuqa muddo 30 maalmood ah gudahood laga bilaabo taariikhda ogeysiiskan.

Shaqaalaha U-qalma waxay diiwaangelin karaan Canugooda(Carruurtooda) Ku Tiirsan marka ugu horraysa ee ay u qalmaan daboolista caymiska ee hoos timaada Qorshaha. Haddii aad ilmo cusub yeelato midkood dhalid ama korsasho, waa in aad ku ogeysiisaa Qorshaha muddo 30 maalmood ah gudahood laga bilaabo dhalashada ama korsashada Canugga Kugu Tiirsan haddii aad rabto in aad daboosho canugga hoos yimaada Qorshahan oo aad dhammaystirto nidaamka diiwaangelinta 60 maalmood gudahooda laga bilaabo dhalashada ama korsashada. Intaa kadib, haddii Qofka Shaqaalaha ah ee Xaqa U Lihi aanu diiwaangelin Canugga(Carruurta) Ku Tiirsan marka Qofka Shaqaalaha ah ee Xaqa U Lihi uu marka ugu horraysa u qalmo caymiska hoos yimaada Qorshaha, Qofka Shaqaalaha ah ee Xaqa U Lihi waxa uu kaliya Canugga(Carruurta) Ku Tiirsan intaa kadib diiwaangelin karaa haddii uu sharci ahaan xaq u leeyahay in uu sidaas sameeyo sida hoos timaado Shuruudaha Diiwaangelinta Gaarka ah ee HIPAA.

FADLAN OGOW- Kabka Magdhowga Daryeelka Ku-tiirsanaha KALIYA waxay khusaysaa daboolista aan lagu iibsan Qorshahan.

Fadlan buuxi Foomka Diiwaangelinta oo la soo celi macluumaadka loo baahan yahay iyo khidmada(ha) billaha oo ku celi Xafiiska Sanduuqa.

# **Greater Metropolitan Hotel Employers-Employees Health and Welfare Fund**

Administered by Wilson-McShane Corporation

3001 Metro Drive – Suite 500  
Bloomington, MN 55425

Phone: (952) 854-0795  
Fax: (952) 854-1632  
Toll Free: (800) 535-6373

## **FOOMKA DIIWAANGELINTA Qorshaha Caafimaadka & Badqabka Shaqo Bixiyayaasha Iyo Shaqaalaha Ee Huteelada Magaalo-Weynta**

Maclummaadka loo baahan yahay- Nuql ka mid ah shahaadada dhalashada ama waraaqaha korsashada, amar maxkamadeed, iyo carruurta xaaskaaga/sayaaga qofkale u dhalay waxaa sidoo kale loo baahan yahay shahaadada guurka.

Magaca Buuxa ee Shaqaalaha: \_\_\_\_\_  
Magaca Dambe                                  Koowaad                                  Dhexe

Lambarka Sooshal Sakuuratiga ee Shaqaalaha: \_\_\_\_\_ Lambarka Taleefanka: \_\_\_\_\_

Ciwaanka Goobta Shaqaalaha: \_\_\_\_\_  
Wadada    Magaalada                                  Gobolka Koodhka Boostada

Magaca Canugga Kugu Tiirsan: \_\_\_\_\_  
Magaca Dambe                                  Koowaad                                  Dhexe

Lambarka Sooshal Sakuuratiga ee Canugga: \_\_\_\_\_ Lab ama Dheddig (Fadlan mid goobo geli)

Taariikhda Dhalashada Canugga: \_\_\_\_\_  
Bisha / Maalinta / Sannadka

Saxiixa Shaqaalaha: \_\_\_\_\_ Taariikhda: \_\_\_\_\_